

Waa maxay NMU

NMU waxay u taagan tahay guddig degaanka (nærmiljøutvalg).

Degmada Sandefjord dugsi hoose oo kasta wuxuu leeyahay guddi degaan. Guddiyada degaanku waxay si walanteeri ah uga shaqeeyaan nidaamka dimoqoraaddiyadda degaanka [nærdemokratiordningen] ee degmada Sandefjord. Waannu kugu soo dhoweyneynaa in aad ka qaybqaadato.

- Aagga dhow ee ay carruurtaadu wakhtigooda ku qaataan ma doonaysaa in uu ka sii fiicnaado sida uu hadda yahay?
- Ma doonaysaa in aad ka qaybqaadato go'aammada khuseeya aagga aad deggan tahay iyo degmadaada?

Hawlaha NMU waa:

- In carruurta iyo dhallinyarada loo suurageliyo korriin wanaagsan
- In xaq loo lahaado in fikrad laga dhiibto dhammaan waxyaalaha khuseeya dadka degaanka deggan, da' walba oo ay yihiin
- Laga qaybqaato kulammada ay ku wada hadlaan dadka degmada laga soo doorto iyo maammulka
- Ma xiisaysaa taraafikada, dhisidda guryaha, aagagga cagaaran, goobaha lagu ciyaaro, firfircooni dad kale lala qabto, waddooyinka la maro marka la luga baxsanayo ama wax kale?

La xiriir guddiga degaanka ee laantaada.

Degmada Sandefjord sanad walba lacag ayay siisaa guddiyada degaanka. Guddiyada degaanku iyaga ayaa go'aamiya sida lacagtaas loo isticmaalayo.

Warbixinno intaan ka badan oo ku saabsan guddiga degaanka iyo nidaamka dimoqoraaddiyadda waxaad ka helaysaa: www.sandefjord.kommune.no/nardemokrati

